

Warbixin ku sabsan xannaanada carruurta ee Myggan

Xannaanada Myggan ee gubetey jimicihii waxay xirnaandoontaa ilaa xilli aan la garanayn. Asbuuca 38aad carruurta Myggan dhigata waxa la geyndoonaa qayb ka mid ah skoolka Sylte F-6 iyo sylte 7-9.

Isniinta 18/9 carruurta u baahan xannaano waxa la geyndoonaa Myrtuvan. Walidiinta ay carruurtooda arrintani saamaysona waa la wargeliyey.

Laga bilaabo maalinta talaadada 19/9 carruurtii waxa ay sii tegidoonaan qaybahan hoose

Marka la furayo xannaada iyo marka la xidhayoba waxa lagu kulmayaa qolka/hoolka kulanka. Kuma xirna qeybta ay carruurtu dhigtaan. Waxaana laga galaa qeybta Fritidsgårdka.

Haddii aad imlahaga xanaadada geeneyso 7:³⁰ subaxnimo ka hor ama aad ka soo kaxaynayso wixii ka danbeeya 16.¹⁵ galabnimo waxaad geyneysaa qeybta hoolka kulanka ee iskuulka Sylte fasallada 7aad ilaa 9aad.

Aroortii marka carruurta dhammaan wada yimaadaan hoolka ayaa la kala qaybindoonaa. Saacaddu markay tahay 16.¹⁵ galabnimo carruurta oo dhan waxaa la geyneyaa hoolka kulanka ee iskuulka sylte fasallada 7aad ilaa 9aad.

Arroortii waxaa lagu wada kulmayaa isku meel, kulanaka ka dinba carruurta waxaa loo kala diridoonaa qaybaha ay kala dhiganayaan:

- Carruurta dhigta qaybta **Blåklinten** iyo **Maskrosen** waxay si ku meelgaar ah u sii joogidoonaan iskuulka Sylte F-6 (fasalka F- 6) oo laga siindoono laba fasal.
- Carruurta dhigta qaybta **Mygglarven blå**, **Mygglarven röd** iyo **Tussilago** waxay iyaguna si ku meel gaar ah ugu sii sugnaandoonaan Iskuulka Sylte 7-9 (fasallada 7aad ilaa 9aad) iyo aulan(qolka / hoolka kulanka). Waxana laga galaa qeybta Fritidsgård.

Halkan riix si aad u aragto maabka ama tilmaanta iskuulka Sylte iyo meesha uu ku yaal.

Shaqaalaha ka shaqaya xannaanada Myggan waxay aroorta talaadada joogayaan labada qeybood ee iskuulka Sylte. Waxayna walidiinta iyo caruurta ka caawinayaan fasallada iyo qeybaha ay carruurta dhiganayaan.

Xannaanada Myggan marka dib loo hagaajiyo oo la nadiifiyo ayaa carruurta dib loogu soo celin doonaa qaybohoodii ay hore u dhigan jireen. Inta ka horaysana fasallada ku

meel garka ah ayey sii joogeeyaan. Ilaa iyo hadda ma cadda inta ay wakhti qaadanayso din u hagaajinta xannaanada Myggan iyo xilliga dhabta ah ee ay carruurtu dib ugu laabandoonaan.

Haddii aad su'aalo qabtaan ama faahfaahin u baahan tihiin waxaad la xiriiri kartaan labadan lambar ee hoos ku qoran:

0520-49 74 10 ama 0520- 49 66 88